This page was exported from - Laashin Iyo Hal abuur
Export date: Sun Jan 21 23:52:14 2018 / +0000 GMT

Xulka iyo Xusuusta Suugaanta Q2AAD. W/D: Xasan Cabdulle Calasoow ?Shiribmaal?

Xulka iyo Xusuusta Suugaanta Q2AAD. W/D: Xasan Cabdulle Calasoow ?Shiribmaal?Xulka iyo Xusuusta Suugaantu, waa taxane aan ku taabba gelinayno suugaantii ay ka tageen halabuurradii caanka ahaay ee maguurtada sooyaalka galay, ha ahaadeen kuwa geeriyooday iyo kuwa iminka nool'e. Wuxuu noqon doonaa taxane maalin kasta oo Arboco ah kusoo bixi doona, mareegta **LAASHIN.COM.** Waxaan ku diiwaan gelin doonnaa guud ahaan suugaanta Soomaaliyeed jaadadkeeda kala geddisan, intii aan awood karno.Guurowgaan magaciisa waxaa la yiraahdaa: **?Su'aal furan?**waxaana tiriyay **Abwaan: Maxammad Gacal Xaayoow** Eebbe ha u naxariisto'e. Laashin **Maxamed Gacal Xaayoow** Guurowgaan wax badan ayuu ku soo koobay, sida: dhaca, Kufsiga iyo wax kasta oo xummaan la sameeyo ah waana Digniin dhaxal gal ah iyo SU'AAL uu Dhallinyarada Soomaaliyeed weydiiyay intowsan dhiman ka hor! La ma na helin halabuur uga jawaaba intii uu noolaa iyo haddow dhintay ka dibba, maxaa yeelay wixii uu qoonsaday laashinku, waxba is kama beddelin in xaalku ka sii daro maahane. **Laashin: Maxammad Gacal Xaayow w**uxuu ahaa laashin indheer garad ah, jeclaana in nabad lagu wada noolaado, Eebbe Jannadiisa ha ka waraabiyee, Guurowgii Su'aal furanna wuxuu u dhigay sidaan ee ka bogasho wacan:**Suluf iyo abaaraa kacaya, Salawya jiilaaleDadka sabarya iibaan la'aan, Lagu siyaaddeeyeSayr iyo ninkii faal sorwayn, Subixi soo qaataEe surun istaagaye qofkii, Socota soo leexshaEe wixii sakaallada ku jira, Sahal ku soo saaraSar qabyaana haystee si wacan, Loo sallixi waayaySaf ballaaran oo wada socdee, Wada sinaysaayoSujuuddina lahayn oon salad subax, U hiiraysanHaddii sida islaannimadu tahay, Sadarka loo raacoSoohdin baa u tiillaye walee, Seero gudub maahanDhalin yarada Soomaalidee, Sida xun caadeestaySinjigeey beddelataye wixii, Sababay ceebaalkaSahalaan jawaab uga rabaa, Waa su'aal furane.Waxa suulay dhaqankii hiddaha, Saafi ku ahaayeSafar dhibe jid gooyaa batiyo, Saaraq iyo tuugeAdoo sarar ku miinliyo carruur, Saad u jirinaayaMa sabraan maseexdaan hadaan, Soorta loo karineHaddaad socoto suuqaya guryaha, Meesha kala soocdaNin surwaalka gaabsaday haddoow, Subixi kuu yeeroSoo soco gacmaha sare u tag, Waa silloontahayeSandullowna kugu baarayaa, Seedda muruqaaheSabool baahan wixii laga dhacaa, Waa sun iyo boogeDhalinyarada Soomaalidee, Sida xun caadeestaySinjigeey beddelataye wixii, Sababay ceebaalka Sahalaan jawaab uga rabaa, Waa su'aal furane.Sarriigbaa wajiga loo tirtiray, Salaxda foolkaaheSi xilliyo si daran beey hunguri, Ugu socdaalaaneSafar bililiqaa waa midaan, Sama aruurayneSoofti laga tabcana waa midaan, Sama ku waarayne Sadaqiyo sawaab ma leh haddaad, Saa'id bixidaayeSaciirana hormuud baad u tahay, Salawga NaareedeSadarrada qur'aankiyo cilmiga, Qiil wax socodsiiyaIn kastood ka saanido xalaal, Lagu saleey maayoWax ku sugaya weeyee haddii, Suurka la afuufoDhalin yarada Soomaalidee, Sida xun caadeestaySinjigeey beddelataye wixii, Sababay ceebaalkaSahalaan jawaab uga rabaa, Waa su'aal furane.Sunna meher waxaa looga dhigay, Sowjo lagu yeeshoSayidkeeda moogiye cid kale, Yay ku saan daraneSeddex kama dhaxayseen rabbigii, Soohdintuu dhigayeSuldaan keedi naagtow dhintaye, Seerka lagu aasaySawir lagu gartiyo waxaa ay lahayd, Salaw asaayeedeSalaantaba Ilaah umma bannayn, Salabka soo taageSaqajaanka xoogaye kufsaday, Waad la socotaaneSummayn meesha lagu gowracaa, Summal ku quustaayeIn sagaal biloodley la helo, Subaxdi foolaysaSoo raagimaysoo kolley, Saa danbey imaneDhalin yarada Soomaalidee, Sida xun caadeestaySinjigeey beddelataye wixii, Sababbay ceebaalkaSahalaan jawaab uga rabaa, Waa su'aal furane.Soormacaan haddoow dhaco abaar, Suuman dubataan ahWebi sinanti waa noo dhinneed, Saatan oo kala'eWeled suubban oo lagu hirtiyo, Saalax baa jiraye Sabar laawe aan waalidkii, Wax u siyaadayninOon hooyadii silic ka bixin, Soow u hana qaadayEe sandaqad ijaaraya sariir, Suganta maanoowdaySakeel lagu qubaystaya surwaal, Tolane huudheey ahSeddexdaa u kulantana inoow, Seeri ka arooro**

Ambow saca adoogii ka shubo, Seligi ceel dheereSalaama Allanow yiri ee sabtiya, Axadba soo booqdoNinka sugaya suugaan murti leh, Waa ku sabaryaa'eDhalin yarada Soomaalidee, Sida xun caadeestaySinjigeey beddelataye wixii, Sababay ceebaalkaSahalaan jawaab uga rabaa, Waa su'aal furane.Silsilada wareegtiyo waqtiga, Laysku daba soohayXilliyada wada socdiyo saacadaha, Sin isu waydaartaySalka kaca abaaraha dhiciyo, Sawaxankii yeeraySedbursiga waxaan rabo isii, Lagu saleeynaayoSeebaadka gudihiyo wixii, Saxanya weel yiillaySalli lagu dukadu iyo kursigi, Lagu santeecsaayaySariirtaan ku jiifnaya wixii, Lagu la seexaayeyMar haddii la kala saarsadee, Suuqa laga iibshayOogada sarreetiyo kuwaa, Saqafka fiiqaayaSeeftu waa ku marataa maraad, Sigato dhowr jeereXoolahaaba noo kala suntane, Sun iyo waabaayoRabbi kugu salliday maalinbaad, Sahal u leeftaaneSibraarkaad wax uga qaadataa, Muumin saafiya'eDhalin yarada Soomaalidee, Sida xun caadeestaySinjigeey beddelataye wixii, Sababay ceebaalkaSahalaan jawaab ugu rabaa, Waa su'aal furane.Ninkii soof yatiimeed dhacee, Seef ku maquuniyeySiraadkina horyaallow wallee, Sama ku waar maahidSowjaan wiil laheen ee adduun, Sabar la'aan taaganEe sagaashan keedii go'aye, Boqol ku sii jeeddaSiddeed beri waxay tuugsataye, Suuqa laga siiyeyNinkii saacad uga meersadoow, Sama ku waar maahidNinkii gabar susubanee surkiyo, Luquntu dheeraatayEe sarwaadi shiiqii dhaliyo, Suurad Awliyo lehSeddex luuq kalaabaye kuwii, Sugayay gaarsiiyeySafka horena galayoow wallee, Sama ku waar maahidWax kastaba sameeyee wuxuu, Siray naftiisiiyeDhalin yarada Soomaalidee, Sida xun caadeestaySinjigeey beddelataye wixii, Sababay ceebaalkaSahalaan jawaab ugu rabaa, Waa su'aal furane. La soco qaybaha xiga haddii Eebbe idmo.**W/D: Xasan Cabdulle Calasoow "Shiribmaal"**